Ausländerbeirat München

Infobus für Flüchtlinge

Somali

Macluumaadka loogu

Ein Gemeinschaftsprojekt von

MFR Münchner Flüchtlingsrat
Preisträger 2000 „Münchner Lichtblicke"
Gefördert von der Landeshauptstadt München

AMNESTY INTERNATIONAL

MACLUUMAAD/ AKHBAAR MAGANGALYAD OON

Hage habdhaqan wadaag nidaamka magangalyadoon loogu talagalay qaxootiga degan xarunta qaabilaadda ee Munich.

Gefördert von der Europäischen Union
Europäischer Flüchtlingsfonds

UNO-Flüchtlingshilfe

Buug/Hage nidaamka magangalyadoon

Ku soo dhowow Jarmalka!
Buuggan/hagahan waxaad ka heleysaa hordhac nidaamka magangalyadoon ee Jarmalka. Hagahan/Buuggan waxaa loo farsameeyay si ad ugu qaadatid boorsada amaba jeebka jubbadda. Sidaasi darteed wuu yar yahay waana qafiif. Waxaad ka heleysaa jawaabta su'aalaha aad qabtid qaarkood. Laakinse marka aad akhrisid kaddib, waxaad ogaanaysaa meesha aad ka helaysid macluumaad dheeraad ah iyo cidda aad su'aashaad qabtid aad weydiin kartid.
Nasiib wanaagsan!



*Kooxda Macluumaadka wareega (**Infobus**) ee Munich*

Macluumaadka ku horyaalla barta qaabilaadda EAE ee Bayernkaserne: Arbaco 6:00-8:00 fiidnimo iyo Isniin 4:00-6:00 gelinka dambe.

Sabtida 3-5 galabnimo (Baierbrunnerstr14)

Kala xiriir: infobus@amnesty-muenchen.de
Info-Bus c/o amnesty international, Volkartstr. 76, 80636 München
www.muenchner-fluechtlingsrat.de
mobilka: 0176/676 063 78, Fakiska c/o MFR 089-123 921 88

Halkeed ka heleysaa macluumaadka?

Waxaad su'aalaha la xiriira codsigaaga magangalyadoon u jeedin/weydiin kartaa cinwaannada soo socda ama garyaqaan:
Rechtshilfe fur Ausländer/innen, in EineWeltHaus, Schwanthalerstraße 80, 80336 München (Theresienwiese/U4/5 agteeda), telefoonka 089/856375-21; latalin shaqsi waa talaado, 6-8 galabti (qoritaanka wuxuu bilaaban 5:15 galabti)
Amnesty International/Bezirk München/Oberbayern, Volkartstr. 76, 80636 Munchen
telefoonka:089/165412, Faxiska:089/165404, cinwaanka: infobus@amnesty-munchen.de
Isniin- Khamiis sacadda 5:00-7:00 galabnimo/fiidnimo, Arbacada 7:00-8:00 galabnimo/fiidnimo waa sacadda wadaxaajoodka qaxootiga.

Haddii aad tahay haween una baahan tahay talooyin la xiriira xaaladdaada qaxootinimo ee Jarmalka, fadlan la xiriir:
IADWIGA (telefoonka:089/54497-233) ama SOLWODI (telefoonka:089/27370600). Haddii anay cidina kaa qaban telefoonka, fadlan ugu reeb farriin magacaaga iyo nambarka telefoonkaaga. Dib ayaa laguu soo wacidoonaa.

Su'aalaha la xiriira inad dalka ka baxdid ama amarro masaafuris fadlan la xiriir:
Jesuitenflüchtlingsdienst JRS, Velleystrafse 24, 81371 München, telefoonka: 089/7299 7781, fakiska: 72013946 (talaado 3-6 galabnimo, Khamis 9:00 subaxnimo -12:00 duhurnimo ama ballan telefoonka) Thu 9-12 am and by arrangement by telephone)

Xatta haddii lagugu hayo xero aad ku sugaysid masaafuris, waxaa jira adeege bulsho oo aad la hadli kartid.
Xattaa haddii aad xirantahay, waxaad la xiriiri kartaa Amnesty International ama Jesuit Refugee Service.
La xiriiridda hay'adahan waxay kaa caawini kartaa sidii aad Jarmalka ku joogi lahayd xattaa haddii aad xiran tahay si laguu masaafuriyo.

Latalinta Sharciyeed oo lacag la'aan ah lagama helo Jarmalka, laakinse waxaad macluumaad ka heli kartaa meelaha halkan ku qoran adiga oo aan wax lacag ah bixin.

Xuruufta la soo gaabshay ee meelaha aad la xiriiri kartid sida ay u kala horreeyaan

1. EAE	**E**rst**a**ufnahme**e**inrichtung loogu talagalay codsadayaasha magangalyadoon (***Xarunta qaabilaadda***)
2.1 ZABH	**Z**entrale **A**usländer**beh**örde der Regierung von Oberbayern (**Dowladda Gobolka Bavaria ee Sare**)
2.2 EASY	**E**rst**a**ufnahme **As**yl (Waaxda ZABH) (***Xafiiska Koowaad ee Diwaangelinta magangelyadoonka***)
2.3 ZRS	**Z**entrale **R**ückführungs**s**telle (Waaxda ZABH), (***Bartamaha qaybta Masaafuriska***), marka laga tago cinwaanka qaybtan waxay ka masuul tahay arrimaha degganaashaha Jarmalka
3. BAMF	**B**undes**a**mt für **M**igration und **F**lüchtlinge (***Xafiiska Socdaalka Federalka ee aqoonsiga qaxootiga ajnabiga ah***)
4. ABH	**A**usländer**beh**örde der Stadt München (= Kreisverwaltungsreferat KVR) (***Dowladda Hoose Ajaanibta Waxda Munich***)
5.1 VG	**V**erwaltungs**g**ericht (racfaanka koowaad ee didmada magangalyodoonka) (***Maxkamadda Maamulka ee Cadaaladda***)
5.2 VGH	**V**erwaltungs**g**erichts**h**of (racfaanka labaad ee diidmada magangalyadoonka) (***Maxkamada Sare ee Cadaalada***)
AsylbLG	**Asylb**ewerber**l**eistungs**g**esetz (***sharciyada taakulaynta bulsho ee codsiyada magangalyadoon***)

Qaanuunnada Dahabiga ah ee Noloshaada inta aad ku jirtid marxaladda magangalyodoon

Markastaba wado waraaqahaaga degganashada tan ugu dambaysa!
Haddii Boliska ay ku baaraan aadna caddayn kariwaydid cidda aad tahay waxaad geli kartaa mixnad adag (ganaax fal dembiyeed, xarig).
Xaqiiji in warqadaha ka imaanaya Dowladda lagugu soo diro cinwaanka aad deggantahay!

Toddobaadyada iyo bilaha ugu horreya inta aad ku jirtid marxaladda magangalyadoon, waxaa lagu dejinayaa Xarunta Qaabilaadda EAE. Warqadaha Boostada ka yimadda madaxda (sida ballannada dhegaysiga, ogeysiisyada) waxaa lagugu soo dirayaa Xarunta qaabilaadda. **Maalin walba fiiri** boorka ogeysiisyada isla markiina soo qaado warqadahaaga. Haddii aadan sidaas yeelin waxad aqrinaysaa go'aanno muhiim ah waqti dambe waxadna halis u tahay inaad dib uga dhacdid waqtigi lagaa rabay inaad ka jawaabtid. Lagaama aqbalaayo marmarsiiyo; tani waxaa loo qaadanayaa ballandarro dhinacaaga ah.
Haddii aad u guurtid meel kale ee Munich amaba meel kale inta aad ku jirtid marxaladda magangalyadoon, waa inaad wargelisid BAMFta adiga shaqsi ahaan siisid cinwaankaaga cusub. Cinwaan cusub ayuu ku siinayaa xafiiska Qaybta Ajaanibta oo Boschetsriederestrafse 41, laakinse BAMFta ma ogaan karto cinwaankaaga cusub ilaa aay adiga kaa hesho macluumaadka cinwaankaaga cusub.
Cinwaankaaga cusub waxaa surtagal ah in ay jiraan qodobbo ka duwan kuwi hore si laguu soo gaarsiyo waraaqaha kuu socdo/Boostadaada. Xaqiiji inaad shuruucdaas taqaanid!
Inta aadan u gudbinin warqadahaaga Madaxda/Masuuliyiinta, ka reebo nuqullo gal ku xafido ayaga iyo waraaqahaaga/ dokumentigaaga kale.
Waxaad xaq u leedahay inaad nuqul warqadahaaga aad warsatid maamullada, laakinse si aay kuugu surtogasho waa inaad ogaataa qaybta aad u dirtay warqadaha iyo xafiiska haya warqadahaaga. Waxaa fiican markasta aad waraaqo ama dokumenti aad gudbisid inaad warsato rasiid (warqad caddaynaysa in lagaa qabtay dokumentiga). Gal ku xaffid dokumentiga iyo waraaqaha aad ka heshid xafiisyada dowladda, dokumentiga aad iyo aad ayuu muhiim u yahay Jarmalka.

Caafimaad iyo Xaaladda (Sharciga iyo Degganaasho)

Baaristaada caafimaad uu kaa qaado xafiiska caafimaadka waa sharci layska rabo waxaana la sameeyaa 3 maalin gudahood marka Jarmalka lagaa diiwaangeliyo. Waxaa ku wehlindoona shaqaalaha nabadgelyada. Baristan caafimaad marka ugu horeyso waxay tahay in la helo/la ogaado cudurrada laysqaadsiiyo oo la daweynkaro, ujeeddada maaha in la baaro xaaladda aad ku sugantahay jir iyo maskax ahaan. Marka lagu baaro waxaa lagaa saaraa Raajo (X-ray) xabadka ama feeraha, waxaa la baarayaa dhiiggaaga oo dhiig ayaa lagaa qaadaa si looga baaro cudurrada lays qaadsiiyo. Waa in lagaa qaadaa saxaro si looga baaro gooryaan (bacteria iyo deris ku nool) Haddii aad uur leedahay laguma saari karayo raajo (x-ray) waxaa lagaa qaadayaa xaako maqaarkaagana waa la baarayaa, waxaa kale oo lagugu sameeynaa baaris dheeraad ah oo dhiigga. Baaristan guud waxa loola jeedaa marka hore in aad si dhaqso ah u heshid wixii daweyn ee muhiimka ah.Waxaa kale oo loola jeedaa in la yareeyo khatarta in cudurrada ay ku faafaan xarumaha qaabilaadda oo ay dadka ku badan yihiin mararka qaarkood.

Haddii aad la ildaran tahay dhibaato caafimaad ee aan lagaa baarin adiga qaad talaabo oo sheeg.

Waxaad la xiriirtaa adeegayaasha bulshada iyo dhaqtarka jooga Baierbrunnerstrafse.

MAXAAD SAMEYN HADDII UU JIRO XANUUN?

Waxaad helaysaa warqadda jawaabta barista caafimaad haddii aad xanuunsan tahay oo keliya. Warqadda waxaa kuu turjumi kara adeegayaasha bulshada ama infobus. Haddii maamulka caafimaadka ay kaa helaan cudurrada lays qaadsiiyo waxay u baahan yihiin in ay la socodsiiyaan maamullada dowladda. Marxaladdan Waaxda Magangalyadoonka waxay helaysa oo keliya aqbaarta in ad markale aadeysid baaris caafimaad ama takhtar. Qaybta Magangalyadoonka lama ogeysiinayo cudurradaada. Haddii xaaladdaada caafimaad ay u baahan tahay daweyn gaar ah,takhaatiirta xafiiska caafimaadka dib ayeey kugu yeerayaan si lagaala hadlo tallabooyinka xiga waxaana ku caawin doona turjubaan. Markaas kaddib waxaad dooran kartaa inaad la hadashid Gole Macluumaad ama sababo luqad ama dhaqan darteed inaad talo ka raadsatid takhtar kale.

Takhtarka Guud (GP) ee jooga Xarunta Qaabilaadda waa takhtar caafimaad, oo la shaqeeya Qaybta Magangalyadoonka. Laakinse takhtarka sida takhaatiirta kale ayuu leeyahay xaruun caafimaad ee asaga u gaar ah. Asaga ayaa ku daweyn kara amase wuxuu kuu gudbin karaa takhtar kale ee takhasus leh. Jarmalka waxaad u baahan tahay inaad marka hore u tegtid takhtar guud si laguugu gudbiyo takhtar gaar ah ama cusbitaalka.

(Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah ee la xiriirta xuquuqda bulsho bogga 22)

Xuquuqda iyo waajibaadka dhanka nidaamka magangalyadoon

XUQUUQDAADA

- Marxaladda magangalyo (iyo inta racfaanka), lama oggola in lagugu amro ama lagugu qasbo inaad la xiriirtid safaaradda ma qunsuliyadda dalkaaga hooyo si aad uga heshid basaboor kale. Haddii aad sidaasi sameysidna waxaa dhumaya/lumaya fursadda codsigaaga magangalyadoon, waayo waxaad geleysaa magangalyada dalkaaga hooyo.
- Dhagaysiga magangalyadoon waxaad xaq u leedahay turjubaan afkaaga hooyo iyo af kale ee labaad oo aad si fiican u fahmaysid. Waxaad keensan kartaa haddii aad doonto turjubaankaaga adigaana la baxaya kharajka.
- Codsadayaasha haweenka ah waxay ku adkaysan karaan in loo keeno turjubaan/afnaqe haween ah iyo in qofka su'aalaha weydiinaya ama la doodaya inuu noqdo qof haween ah.
- BAMFta waxay leedahay doodayaal/weydiyeyaal u gaar ah oo xirfado gaar ah leh, loona carbiyey si aay su'aalo u weydiiyaan qaxootiga oo baahi gaar ah u qaba in la badbaadiyo.
- Marka aad imaanaysid dhegaysiga haddii aad horey ugu sheegtid BAMFta waxaaa laguu oggol yahay inaad hore u soo wadatid qof aad ku kalsoon tahay.
- Haddii aad keligaa tahay kana yar tahay 16 sano, kuma quseeyo sharciga qaxootiga ee dadka qaangaarka ah, sidaasi darteed waxaad u baahan tahay qof sharci ahaan kaa masuul ah dhanka arrimaha magangalyadoonka. Masuulka/iIaaliyaha waxaa kuu magacaabaysa maxkamada arrimaha masuuliyadda/ilaalinta. Waxaa surtagal ah in ay lagama maarmaan tahay in ay maxkamadda masuuliyinta ay xaqiijiso da'daada iyo in waalid la'aan aad tahay. Ilaa iyo inta aad 18 jirsato, da'daas oo ah da'da qaangaarka ee Jarmalka, waxaad u baahan tahay qof masuul kaa ah oo ilaaliye ka ah arrimahaaga oo dhan.
- Waxaad xaq u leedahay inaad heshid nuqullo dokumentigaaga asalka ah ee aad u gudbisay madaxda/dowladda. Kala sooc dokumentiga eena xaffid waqti dheer intii karaankaaga ah.

7

Ciddee wax ka qabata marxalaadda magangalyadoonka?

Boliska (P ee Munich,, Ettsraße " oder" PI29)
ⓘ Wuxuu fuliyaa waxa BAMFta iyo (Z)ABHta aay go'aamiyaan - ⓘ **Maaha adeege nabadgelyada** xarunta qabilaadda
ⓘ Wuxuu masuul ka yahay inuu kaa badbaadiyo dibindaabyada ama qatarta

Dawlada oo Bavariada Sare (ROB – Qeybta Dhexe ee Ajaanibta (ZABH), Munich "Boschetsriederstraße")
ⓘ Waxeey masuul ka tahay qabashada codsiyada magangalyadoonka biloowga ah (Qeybta EASY) - ⓘ Waxeey maamushaa arrimaha deegaanka iyo xuquuqda deganaashaha Jarmalka ilaa iyo inta lagaaga aqoonsanayo qaxooti siyaasadeed.
ⓘ Waxeey ku siinaysaa meel aad dagtid marka aad ka baxdid Xarunta Qaabilaada, meeshaasi ayeey masuul kaaga sii ahaneysa (Qeyba ZRS/EASY) - ⓘ Waxeey amri kartaa Boliska in ay ku xiraan haddii qasab ay noqoto in lagaa saaro Jarmalka.

Xafiiska Socdaalka Federalka ee Aqoonsiga Qaxootiga Dibedda (BAMF, ee Munich, "Boschetsriederstrafse")
ⓘ Wuxuu kaa dhageysanayaa sababaha aad u raadinaysid magangalyadoonka (dhagaysi, wareysi) wuxuu baaris dheeraad ah ku sameeynayaa wixii aad horey u sheegtay, jidki aad ku soo carartay/safarkaagi iyo aqoonsigaaga. Waa xafiiska maamulka bulshada maaha maxkamad. - ⓘ Wuxuu go'aan ka gaaraa codsigaaga magangalyadoon wuxuuna wargelinayaa (Z)ABHda.
ⓘ Wuxuu caddeeyaa in aad ku noqotid dalka Yurub ee aad marka horeba aad ka soo degtay ama ka soo gashay iyo in kale.
ⓘ Wuxuu masuul ka yahay oo kale inuu ku siiyo tababarro la xiriira sidii aad Jarmalka noloshiisa ula qabsan lahayd (sida tababar luqadda Jarmalka)

Qeybta dadka shisheeye ee magaalada ama Degmada (ABH = KVR, ee Munich: „Poccistraße")
ⓘ Waxay bixisaa warqadaha aqoonsiga haddii aad sii degganaaneysid Munich iyo/ama haddii laguu aqoonsado qaxooti.
ⓘ Waxey amri kartaa boliska si laguu xiro haddii ay tahay inaad Jarmalka ka baxdid

Maxkamada Maamulka (VG, ee Munich: "Bayerstraße")
ⓘ Waxeey heshaa rafcaanka aad ka qaadatay diidmada magangalyadaada.
ⓘ Rafcaan labaad ee lagu hortago **Maxkamadda Sare ee Maamulka Cadaaladda** (VGH) waa inuu garyaqaan uu kuu xereeyo.

Xuquuq iyo Waajibaad ee Nidaamka Sharciga Magangalyadoon

WAAJIBKAAGA ISKAASHI/WADASHAQEYN

Waxaa waajib sharci kugu ah inaad caawintid madaxda adiga oo ka jawaba su'aalaha adiga ama xubnaha qoyskaaga quseeya, tani waxay tahay waa inaad qayexdaa /caddeysaa su'aalaha. Xattaa garyaqaanka kaama fasaxi/joojin karo waajibkan .

Waajibaadka waxay la xiriiraan gaar ahaan

- Caddeynta aqoonsigaaga : waa inaad keentid shahaadooyin laga soo saaray dalkaaga hooyo waxaa habboon ineey ku jiraan kuwa sawirkaaga uu ku dheggan yahay. Waa inaad xaqiijisid inaad haysatid nuqul codsigaaga iyo nuqul dokumentigi/warqadihi aad horey u gudbisay, meel ku qoro magaca sarkaalka iyo lambarka qolka si aad marka dambe u ogaatid halka waraaqahaaga aad u gudbisay (mararka qaar is faham la'aan ayaa ka dhexdhaco saraakiisha).
- Macluumaad iyo haddii aay la xiriirto dokumenti safarkaaga: dalkugal/fiso iyo shahaado caddeynaysa xuduudihi aad ka soo gudubtay, waxaa loo isticmaali karaa caddeyn aqoonsi; dukumenti oo aay ku qoran tahay taariikh (sida warqadda dayaaradda lagu raaco waxay kaa caawini kartaa si aad u caddeysid dariiqii aad soo martay iyo sababta aad u doonaysid magangalyada – Masuuliyiinta/Madaxda aad ayeey muhiim ugu yihiin dokumentiga la xiriira safarkaaga, sababta ugu muhiimsan oo ah go'aankii Dublin (fiiri bogga 12).
- Waajibka diiwaangelin: xaqiiji inaad wargelisid masuuliyinta haddii cinwaankaaga isbeddelo, Isbeddelka xuquuqda degaankaaga, isbeddelka la xiriira arrimaha xaaskaaga iwm. Waxaa wanaagsan inaad wax badan soo sheegto intaad wax aad u yar soo sheegi lahayd. Haddii kale waxaad halis ugu jirtaa inaadan helin ogeysiis ka yimid madaxda, inaad gafto ballammo ama waqti kamadambeyn ah, ama in aysan kuu suurtoobin ka fa'idaysiga xuquuqahaaga.

Waxaa waajib kuugu ah inaad qaadid tallaaba kasta ee suurtagal ka dhigaysa inaad caddeysid aqoonsigaaga iyo inaad xaqiijisid safarkaaga. Haddii aad wadashaqayn buuxda la timaadid si loo caddeeyo aqoonsigaaga, arrintan tixgelin fiican ayeey siinayaan madaxda (Sida marka meel lagu dejinayo)

9

Model for informing the BAMF and VG about your new address

An das BAMF
Bundesamt für Migration und Flüchtlinge
Boschetsriederstraße 41
81379 München

55 Cent

Haddii aad ka qaadatay rafcaan go'aanka BAMFta ee diidmada codsigaaga magangalyadoon waa inaad wargelisaa oo kale VGda ood u sheegtaa cinwaankaaga:
An das Verwaltungsgericht München
Bayerstraße 30
80335 München

Mitteilung meiner Adressänderung – AZ: .....
Sehr geehrte Damen und Herren,

hiermit teile ich Ihnen mit, dass ich ab sofort unter folgender Adresse erreichbar bin:
NAME Vorname
Straße:
PLZ/Ort:

Mit freundlichen Grüßen

_____
Datum / Unterschrift

(Isbeddel Cinwaan _ AZ Lambar:
Gacaliso Marwo, Gacaliye Mudane, waxaan idinku wargelinayaa in cinwaankayga uu isbedellay isla mar ahantan: Magaca qoyska, lambarka jidka, Lambarka Boostada/Degmada
Daacadnimo, Taariikh/Saxiix)

Codsi Magangalyadoon (13 – 22a nidaamka sharciga magangalyadoon)

Halkeed ka codsanaysaa magangalyo?
Saldhig Boliis, Xafiiska Qaybta Shisheeyaha (ABH) amaba si toos ah Xafiiska Socdaalka Bundesamt fur Migration und Fluchthinge (BAMF). BAMFta waxay gaartaa go'aanka in lagu siiyo magangalyo iyo in kale.

Marke/kolke ayaad codsanaysa magangelyo?
Sida ugu dhaqsida badan una surtagalsan, waxaa habboon inaad codsatid magangelyo isla marki aad soo gashid Jarmalka inta aanay ku qaban Boliiska. Waxaad tiraahdaa magangelyadoon ayaan ahay ama qor waxaad rabtid eena dhiib.

Maxaa dhacaya, marka aad magangalyo ku codsatid saldhigga Boliiska ama xafiis kale?
Marka aad **sheegtid** ama **qortid** waxaad rabtid waxaad codsatay magangelyo. Haddii ay lagama maarmaan tahay waxaad codsataa turjubaan. Taasi waa xuquuq aad leedahay. Waxaa ku siinaya warqad **(Aufnahmeschein)** boliiska ama saraakiisha kale. Kani waa dokumenti ku meelgaar ah (kaddib waxaa lagu siinayaa dukumenti cusub, "**Aufenthaltsgestattung"**). Hubi isla markiiba in magacaaga sax u qoran yahay iyo in da'daada ay sax tahay. U sheeg saraakiisha haddii ay wax qaldan yihiin.Haddii lagaa qaado basaboor, dukumenti, lacag ama wax kale oo aad leedahay, waxaad ku dadaashaa in lagu siiyo nuqul ama rasiid meel fiicanna ku xaffid.

Macluumaadka aad si aqtiyaar ah aay tahay inaad u sheegtid
Haddii aay qaraabo kuu joogto Jarmalka amaba aad kala dhunteen xubnaha qoyskaaga inti aad safarka ahayd u sheeg saraakiisha. Hooyo, aabe iyo caruurta aan qaangaarin waxay xaq u leeyihiin in ay isla joogaan (waa xaqa wadajirka qoyska). Waxaa loo oggol yahay in ay wada noolaadaan islana maraan marxaladaha magangalyadoonka.
Haddii aad xanuunsan tahay ama dhibaato caafimaad aad qabtid u sheeg saraakiisha. Caadi ahaan qofna kuma warsanaayo macluumaadkan.

11 Codsiga magangalyadoon (§§ 13-22a Nidaanka Sharciga Magangalyadoon)

Boliiska ama qaybta shisheeyaha waxay ku weydiinayaan su'aasha ugu horreysa.
Tani maaha weli dhegaysiga magangalyadoon waxa waaye oo keliya tallabooyinki ugu horeeyay.
Dhammaan su'aalaha aad ka jawaabtid waxa lagu warsandoonaa markale xilliga dhegaysiga – Jawaabahaaga waa la baarayaa.
Dhegeysiga magangalyadoonka ama wareysiga wuxuu ka dhacayaa BAMFta. Waxaad heleysaa warqad lagugu ballaminayo iyo macluumaad ku qoran afka aad u dhalatay (afkaaga hooyo).

Maxaa lagugu su'aali doonaa qaybta socdaalka shisheeyaha iyo saldhigga boliiska?

Ayaad tahay?

Dalkeed ka timid/ku dhalatay?

Sideed halkan ku timid?

Kuwani waa su'aalaha ugu horeya ee lagu weydiinayo.
Waa inaad keentid dukumenti caddeeynaya cidda aad tahay, caddeeyn aqoonsigaaga (basaboor, ruqsadda baabuur wadista/batante i.w.m) **ama waa inaad mardambe keentaa**. Waxaad xaq u leedahay inaad heshid nuqul waxaaba ka fiican inaad adiga ka reebtid nuqul intaadan dukumentiga dhiibin.
Waxaa lagu weydiindoonaa dalka aad asal ahaan ka soo jedid, waxa aad uga soo tagtay (sababaha aad uga soo carartay iyo sida (dariiqa) aad ku timid Jarmalka.
Haddii aad ka soo gashay Jarmalka dhinaca berriga, masuuliyiinta waxay filayaan in haddiiba sababo siyaasadeed laguu ugaarsanayo, waxay ahayd inaad weydiisato magangalyo dalka ugu soo horreya ee Yurub oo aad soo gashay. Waxaa lagu siin karaa **magangalyo siyaasadeed** haddii aad soo gashay Jarmalka adiga oo ku timid dhanka cirka amaba badda – laakinse fursad in lagu siiyo **aqoonsi qaxooti sababo baniiadaninimo** waa wax dhici kara xattaa haddii aad dhanka berriga ku timid.

Magangalyo Jarmalka ka dal Yurub ahaan

Nidaamka magangalyadoonka ee Jarmalka ma hago keliya sharciga Jarmalka laakinse waxaa kale oo haga sharciga reer Yurub ee ku qoran sharciga loo yaqaan go'aanki Dublin.
Bal aan dib ugu noqonno codsigi magangalyadoon: waxaad u tagtay boliska ama madax kale waxaad codsatay magangalyo. Hadda waxaad u diiwaan gashan tahay codsade magangalyadoon. Boliska ama masuuliyiinta waxay u gudbinayaan codsigaaga BAMFta.

Hadda ma joogi kartaa Jarmalka?
Codsigaaga wuxuu soo gaaray BAMFta. Hadda BAMFta waxay kaa baaraysaa liisaska/diiwaannada dalalka kale ee Yurub, EURODAC. Ma dhici karta inaad dal kale ee Yurub ah aad tagtay, inaad magangelyo codsatay laguuna diiday? Amaba aad ku soo safartay dalkugal/fiiso dal kale ee Yurub ah amaba aad dalkaas si sharcidarro ah ku soo gashay? Haddii aay arrinta sidaan tahay dalkale ee Yurub ah ayaa arimahaaga magangalyadoon ka masuul ah. Haddii aad dalkale ee Yurub ah aad gashay intaadan Jarmalka iman dalkaasina lagaa diiwaangelshay dib ayaa laguugu celinayaa. Saddex bil gudahood ayeey BAMFTA kula xiriiraysaa dalkaasi reer Yurub. Haddii aysan ku diidin inaad dib ugu laabatid muddo labo bilood ah marka lala xiriiro kaddib, waa inaad adiga dib ugu laabatid dalkaasi. Tani waxay dhici kartaa xatta haddii aad bilooyin badan aad joogtay Jarmalka.
Laakinse waa inad ogaataa: Haddii xubno ka tirsan qoyskaaga aay joogaan Jarmalka, masuuliyiinta Jarmalka waxaa dhici karta in ay waajib ku tahay nidaamka magangalyo sababta oo ah xuquuqda wada noolaashada qoyska. Waxaad kale aad codsan kartaa inaad joogtid Jarmalka sababo baniaadaninimo xatta haddii aad dalkale ka diiwaan gashantahay. Tani waxay quseysaa, bilmatal sababo qoys, ama haddii aay arrimo caafimaad oo culus jiraan. Samee codsigan isla markiiba marka aad bilaabaysid nidaamka.
Masuuliyiinta ayaa kugu soo wargelin doona kol dambe go'aanka dalka kale ee Yurub. Tani macnaheeda wuxuu yahay waxaa laguu sheegaa in dib lagugu celinaayo dalki kale wax yar ka hor inta aadan ka tegin Jarmalka. Inta aad joogtid jarmalka weydii cinwaannada golayaasha macluumaadka ee dalka Yurub ee marki kugu horeysay lagaa diwaan geliyay.

13 Magangalyadoon Jarmalka dhexdiisa, dal ka kooban 16 Dowlado Federal ah (Bundesländer)



Waxaan ka soo qaadeynaa inaad joogtid Jarmalka
(§§44-46 nidaamka sharciga magangalyadoon AsylVerfG)

BAMFta waxay kugu wargelinaysaa dawladda aad ka joogaysid **16ka dowladaha federalka** – waxaa laga yaabaa in dalkaaga looga yaqaan gobollo, degmooyin amaba dowlado – aadna ku maraysid nidaamka magangalyadoon. Waxaa laga yaabaa in hal dowlad goboleed keliya aay qaabilsan tahay qaxootiga ka yimaada dalkaaga. Taasi darteed ayaa lagugu soo wareejinayaa dowlad goboleedkan. Inta aad ku jirtid marxaladda magangalyadoon waxaad caadi ahaan ku noolaanaysaa halkaas. Ugu horeyn waxaad joogaysaa **xarunta qaabilaadda** EAE ugu yaraan 6 toddobaad ama caadi ahaan ugu badnaan 3 bilood. Markaasi kaddib waxaa lagu siinaya hooy aay leedahay dowladda hoose. Caadi ahaan waxaad joogaysaa halkaas ilaa iyo inta aay soo dhammaanayso marxaladdaada magangalyadoonka. Waqtigaas laguuma oggola inaad ka tagtid Dowalad goboleedka aay masuul ka tahay Qaybta Ajaanibta xafiiska ABH. Si aad uga tagtid gobolkan, waxaad u baahan tahay ruqsadda ABHta.
Waxaa laguu oggol yahay inaad go'aansatid halka aad degaysid keliya marka lagu siiyo sharciga qaxootiga (Qodobka 16 & GG ama § 60 (1) AufenthG) ama haddi la guddonsado in ay jiraan caqabado la xiriira masafurintaada aadna leedahay ruqsad degganaasho (§25 (3) AufenthG)

Maxay tahay arrinta qoyskaaga?

Haddii aad la timid qoyskaaga amaba aad ku leedahay Jarmalka xubno ka tirsan qoyskaaga (abbe, hooyo, qof masuul kaa ah, caruur yar yar) waxaad ku adkaysan kartaa in ay (Z)ABHta kuu oggolaato inaad la noolaatid qoyskaaga. Xaq ayaad u leedahay arrintan. Waxaa taasi la mid ah haddii aad ku leedahay Yurub dhexdeeda xubno ka tirsan qoyskaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad kula noolaatid dalka aay deggan yihiin laakinse Yurub adeer/abti, eedo/habaryar amaba ilmoadeer/ilmoabti looma aqoonsana xubnaha qoyskaaga – laakinse, haddii adiga amaba qof qaraabadaada ah uu xanuunsan yahay, tani waxay tixgelin siinaysaa sabab laguugu oggolaado inaad meel u dhow qaraabadaada aad ugu noolaatid, xattaa haddii ay yihiin qaraabo fog amaba aad adiga oo ah qof qaangaar ah aad ula noolaatid waalidkaa.

Wareysiga/Dhagaysiga ee BAMF

Sidee dhegaysiga BAMFta u meelmaraa?
("Waxaad tafaasiil ka helaysaa buugga yar ee macluumaadka" 'Informationsverbund Asyl' kani waxaad ka heli kartaa bilmatal Infobuska)

Waxaad ka helaysaa BAMFta ballan qoraal ah ee taarikhda iyo waqtiga dhageysigaaga – waa inaad timaadid BAMFta (ee Munich ee Boschetsriederstrafse 41) ugu yaraan 15 daqiiqo ka hor waqtiga ballanta iskana diiwaangeli adeegeyaasha nabadgelyada. Kaddib waxaa lagu geeyna qolka sugidda marka dambane waxaad tagaysaa xafiiska qofka ku wareeysanaayo.
Muhiim: Haddii aadan ku imaan karin waqtiga ballanta (bilmatal waad xanuunsan tahay) waa inaad soo wargelisaa BAMFta marka hore kaddibna soo dir warqad caafimaad. Haddii adan sidaan yeelin waxay caqabad ku nogonaysaa marxaladdaada magangalyadoon, sababta oo ah waxa loo qaadanayaa inaad si ula kac ah aad u dayacday waajibkaagi wada shaqeynta.

Marka ugu horeysa, waxaa lagu weydiinayaa inaad fahmi kartid turjubaanka iyo in adigane lagu fahmi karo. Kaddib turjubaanka/afnaqaha wuxuu rabi doonaa in uu ogaado inaad dabcan nabad qabtid oo aad diyaar u tahay dhegaysiga. Kaddib asaga/ayada waxay ku warsan inaad fahamtay wax allaale iyo wixii la xiriira nidaamka wareeysiga. Haddii aay jiraan mixnado amaba aad qabtid weli su'aalo, isla markiiba sheeg: Bilmatal, haddii aadan fahmin turjubaanka, haddii aadan waxyaabo kale aadan fahmin, haddii aad ka doorbidaysid inaad sheekadaada qof dumar ah u sheegtid amaba qof rag ah (sababta oo ah haddii kale si fiican uma macnayn kartid waxyaabaha muhiimka ah) haddii aad qaadanaysid dawooyin (waxaa dhici karta in feejignaantaada amabase wax faham kaaga aay yarayso. Waxba ha dareemin cabsi xataa haddii uu turjubaanka u dhaqmo sida qof welwelsan. Waa dhegeysigaaga **waana xaqqaaga**. Waa inaad doorbiddid inaad u sheegtid **BAMF**ta waxaad jeceshahay (sida weydiiye dumar amaba rag ah) isla markaasna heshid ballanta dhegeysiga – **BAMF**ta waxaa u suurtagalaya in ay horey kuugu diyaariso weydiiye iyo turjubaan.
Waxkasta oo aad sheegtid inta uu socdo wareeysiga waa la qorayaa waana la diiwangelinaya si tifatiran . Wax kasta uu yeeriyo/meeriyo weydiiyaha waxaa lagu turjumaa luqaddaada. Haddii ay waxyaabaha qaar qaldan yihiin amaba ay kula eg yihiin mixnad isla markiiba sheeg kuna dadaal in arrintani lagu daro qoraalka.

15

Muxuu ku saabsan yahay wareysiga?

Muxuu rabaa inuu weydiiyaha BAMFta ogaado?
Weydiiyaha wuxuu rabaa inuu ku qanco in waxkasto oo aad sheegtay in ay run yihiin ka hor inta aanu ka gaarin go'aan arrintaada. Sababtaasi ayaa si taxaddar leh loogu baaraa waxyaabihi aad sheegtay. Haddii, sida inta badan magangalyadoonka, aadan keeni karin wax caddeeymo ah weydiiyaha waa in uu adiga iyo ereyadaada cuskado suurtagalna aay u noqotaa in uu shaqsi ahaan ku rumaystaa. Weydiiyaha waa in uu sabab u yeelaa go'aankiisa si uu ugu cudurdaarto madaxdiisa. Inta ay weydiinta socoto, waxaad xaqiijisaa inaad sheegtid **wax walba** ee saameeyn ku leh baahidaada magangelyo qaxooti ahaan.
Muhim u ah weydiinta: turjubaanka wuxuu meesha u joogaa si ay suurtagal kuugu noqoto in lagu fahmo. Laakinse qofka aad la hadlaysid waa weydiiyaha, ee maaaha turjubaanka. Waa ku asluub xumo dhaqanka Jarmalka inaad fiirin marka aad qofka la hadlaysid, waxaa loo qaadan karaa islaweyni iyo inaad been sheegaysid. Sidoo kale haddii aad qof salaamaysid waa inaad qofka aad firisaa. Xatta haddii aay taasi ka duwan tahay dhaqankaaga, Jarmalka raga iyo dumarka marka aay wada hadlayaan indhahooda waa is fiirshaan.
Jarmalka waxan wax kasta uga hadalna si toos ah oo saraaxad leh furfurnaan. Haddii aad waxa aad ka hadlaysid aad ka leexleexatid, waxaa laguu qaadanayaa qof an isku kalsooneen oo isku dayaayo inuu waxyabo qariyo. Waxaad lumin kartaa in lagu rumaysto. Xusuuso waxkasta oo aad horey ugu sheegtay masuuliyiinta iyo BAMFta xilligi dhegaysiga dib ayay u baaraysaa VGda haddii aad rafcaan ka qaadatid diidmada codsigaaga magangalyadoon. Xaakimka VGda wuxuu warsan karaa macluumaad dalka aad ka soo jeedid, bilmatal wuxuu la xiriiri karaa safaaradda Jarmalka. Haddii aad keentid caddeeymo cusub amaba sababo hor leh oo cusub oo ku saabsan codsigaaga marka rafcaanka VGda waa inaad qabtid sababo fiican sababta aadan u keenin waqtigi dhegaysiga BAMFta.

Qoraalka tifatiran ee dhageysiga waxaa laguugu soo diraa afka Jarmalka maalmo ama toddobaad kaddib dhegaysigaaga. Sida ugu dhaqsida badan halaguugu turjumo. Waxaad u diri kartaa sixidda qoraallada BAMFta kana codsan kartaa in laguu tixgeliyo. Infobuska ee Qaxooti amaba xafiisyada talooyinka ayaa kaa cawini kara turjumidda.

Fiiro deg deg ah wareysiga magangalyadoonka

Muxuu ku saabsan yahay wareysiga magangalyadoonka?

Wareysiga waa xilliga ugu muhiimsan marxaladda magangalyadoonka, waa **halka** iyo fursaddaada **keliya** ee aad ku fasiri kartid tahriibki iyo tan ugu muhiimsan oo qaxaagi ah sababti aad u soo qaxday. Waxa aad ku sheegtid wareysiga waxay saldhig u noqonaysaa wax walba oo ku xiga. Marka dambe waa laguu oggolaanayaa haddii aad wax ku daraysid wax aadan horey u sheegin laakinse ballanqaad ma jiro in ay taasi dhacayso –haddii aay jireen isfaham la'aan amaba waxyaabo isburinaya su'aalihi hore ay madaxdi aad la kulantay wareysiga waa waqtiga aad wax ku caddeyn kartid.

Su'aalaha aay ku weydiinayaan BAMFta waxay u dhisanyihiin sida soo socota:

① 24 Su'aalo la xiriira qoyskaaga, dalka aad asal

Su'aalaha waxay aalaa la xiriiraan aqoonsigaaga, qoyskaaga iyo sidi aad halkan ku timid.

Su'aalaha waa gaagaaban yihiin – Si toos ah uga jawaab. Haddii aay hadallo iskhilaafsan yihiin amaba aan caddeyn caadi ahaan su'aalo ayaa markale lagu weydiinayaa.

② Halka Su'aal oo ka horeysa tan ugu dambeysa

Su'aashan waa tan ugu muhiimsan. Waxay la xiriirtaa sababaha shaqsi ahaan aad dalkaaga uga soo tagtay.

Ku sharax hadalladaada sida ugu cad laguna qancikaro sababihi iyo dhacdooyinki kugu kellifay inaad dalkaaga ka soo tagtid. Sharraxaaddaada waxay saldhig u tahay go'aanka aay BAMFta ka gaarayso in laguu aqoonsado qaxooti iyo in kale (Qodabka 16 GG § 60 (1) AufenthG)

③ Su'aasha ugu dambeysa: caqabadaha kaa hortaagan inaad dib u noqotid

Su'aashan waxay la xiriirtaa sababta aadan dalkaaga ugu noqon karin.

Sharraxaad uga bixi erayadaada sababaha eena fasir sida aay adiga shaqsi ahaan kuu saameeyaan. BAMFta waxay saldhig uga dhigaysaa macluumaadkaan amar kasta ee in lagu celiyo ah – (§60 (2-7) AufenthG)

Cabbirka go'aanka magangalyadoon

① Xiriirka ka dhaxeeya cadaadis/urgaarsi iyo sababaha qaxa

5 sababood, sababta laguu ugaarsan karo:

Sinji/qabiil

Diin

Yaa ku cadaadiyay/ugaarsaday?

Intee jeer?

Sidee laguu ugaarsaday?

Goorma?

Maxay tahay suurtagalnimada in mar kale lagu ugaarsado haddii aad dib u noqotid?

3 xuquuq, oo aay tahay in sharciyan dal kasta lagugu magangeliyo :

Nolol

Xornimo

Karaamada qofka

② Daafac ka madax bannaan cadaadis/ugaarsi

Dalkaaga ma jirtaa **cid kaa daafacda hujuumka lagu hayo** naftaada, xornimadaada, karaamada Jirkaaga?

Dalkaaga ma jirtaa nolol aad **ka heli** kartid **gobol kale oo aan ahayn gobalka aad asal ahaan ka soo jeedid**?

Xaaladdaada caafimaad si halis ah miyeey u darsan haddi dalka aad asal ahaan ka soo jeedid lagugu celsho?

Fiiro deg deg ah codsiga ugu horreyo ee magangalyadoon

Sida sharciga 1 – 3 bilood

Maalmo yar nidaamka gegida

Codsi magangalyo

Maalmo ilaa toddobaad nidaamka caadiga ah

Wareysi BAMFta

Soo dirid qoraalka tifatiran oo Jarmal ku qoran, fursad qoraal aad ku warsatid sixitaanno

Bilo ama sann ado

Go'aanka magangalyo ee BAMF:

Fiiri oo hubi waxa ay BAMFta xaqiiqadi ka tiri iyo doodda ay ka bixisay aqoonsiga amaba diidmada codsigaaga magangalyadoon. Waxaad rafcaan kaga qaadan kartaa go'aanka BAMFta maxkamadda maamulka caddaaladda ee VG. Tiriska waqtiga kama dambeysta ah eerafcaanka wuxuu ka bilaabmayaa maalinta ogeysiiska go'aanka BAMFta laguu soo diro.

Digniin: Aalaa ogeysiiska adiga shaqsi ahaan ayaa laguu soo diraa. Xarunta Qaabiladda marka aad deggan tahay, waa inaad si joogto ah u baartaa in ay waraaqo boosto kuu timid waxaad fiirinaysa/eegaysaa qolka boostada amaba ka fiiri sabbuuradda ogeysiiska. Haddii aad deggan tahay barta dejinta, boostadaada waxaa loo soo diri karaa maamulaha barta – sidaas oo kale adiga ayay ku quseysaa inaad xaqiijisid inaad boostadaada/warqadahaaga aad dhaqso u heshid.

Haddii codsigaaga magangalyadoon la diido sida "dabcan waxaan sal lahayn", waqtiga laguu oggol yahay inaad xeraysid rafcaankaaga waa 1 toddobaad = 7 maalmood.

Haddii codsigaaga magangalyo si caadi ah la diido si "waxaan sal lahayn", waqtiga laguu oggol yahay inaad ku xeraaysid rafcaankaaga waa 2 toddobaad = 14 maalmood.

<u>Waa inaad keentid caddayn asbaabta rafcaankaaga 4 toddobaad gudahood marka laga soo bilaabo ogeysiiska diidmada.</u>

Rafcaankaga ku socdo VGda, waxaad u baahan tahay inaad la timaadid fasiraad tifatiran sababta ay aragtidaada qalad kuula tahay diidmada codsigaaga magangalyadoon. Cudurdaar u yeel aragtidaada adiga oo sida ugu suurtagalsan u tixraacaya sababaha BAMFta ay ku xustay ogeysiiska diidmada. Latalin sharciyeed iyo, garyaqaan waxay noqonayaan kaalmo weyn marxaladdaan.

Rafcaanka ee maxkamadda sharciga caddaalada (VG)

BAMF :
Diidmada codsiga

„offensichtlich unbegründet“

„unbegründet“

VG

BAMFta waxay diiday guud ahaan codsigaaga magangalyadoon kumana rumeysan.
Waa inaad si deg deg ah aad uga jawaabtid. Waxaad qabtaa **1 toddobaad** si aad rafcaan uga qaadatid go’aanka VGda.

Isla marahantaas waxaad codsataa in la hakiyo amarka masaafiris-kaaga (§ 80(5) VwGO). Tani waxa weeye in la xaqiijiyo inaan lagu masaafurin inta ay socoto marxaladda magangalyadoon.
Rafcaan markaad qaadatid, waxaad codsatay magangalyo amabase in lagaa daafaco masaafuris.

VG

Eraygan wuxuu kale uu la macna yahay in ay BAMFta diiday codsigaaga magangalyadoon.
Waxaad haysataa **2 toddobaad** si aad rafcaan ku qaadatid iyo inaad ku dalbatid in lagu **daafaco qaxooti ahaan** (§ 60 1 AufenthG) amaba ugu yaraan codso in **la hakiyo fulinta in dib laguu celsho amaba lagu masafursho** (§60 2-7 AufenthG)
Tani waxay xaqiijinaysaa inan dib dalkaaga laguugu celin.

BAMF:
Diidmo magangalyo siyaasadeed iyo
sharci qaxooti, laakinse aqoonsi cagabad kaa hortaagan noqosho

VG

2 toddobaad gudahood waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go’aanka VGda oo diidmada codsigaaga magangalyadoon; haddii aad sidaas samaysid waxaad codsatay **daafac qaxooti ahaan** sida ku cad § 60(1).

Haddii siyaasi ahaan laguu kadeeday amaba haddii aad Jarmalka aad ka soo gashay dhanka gegida diyaaradda amaba si toos ah markab, waxaad ku darsan kartaa codsi aqoonsi qaxooti siyaasadeed .

BAMF: diidmo oo Magangalyo siyaasadeed, laakinse aqoonsi qaxooti.

VG

2 toddobaad gudahood VGda waxaad rafcaan ka qaadankartaa diidmada codsigaaga magangalyadoon; sidaasi haddii aad sameysid waxaad codsatay in laguu **aqoonsado qaxooti siyaasadeed** sida ku cad Qodobka 16 a GG.

Rafcaankaaga wuxuu guula-ysan karaa keliya haddi siyaasi ahaan laguu ugaarsaday amaba aad Jarmalka aad ka soo gashay dhanka gegida diyaaradda amaba aad markab ku timid.

Rafcaanka ugu horeeya oo VGda waxaad ku sameyn kartaa garyaqaan la’aan. Kan marka labaad (VGH) garyaqaan waa qassab.

Maxaa dhacaya wareysiga kaddib?

Hadalka tifatiran/midka qoraalka ah ee wareysigaaga waxaa lagugu soo diraa boostada asaga oo Jarmal ku qoran. Haddii aad leedahay garyaqaan, BAMFta waxay si toos ah ugu diraysaa garyaqaankaaga. Mararka qaar si dhaqsa ah ayeey u dhaceeysaa, laakinse mararka qaar waxay qaadan kartaa dhowr toddobaad. Hadda waxaad leedahay fursad aad wax ugu dari kartid qoralka tifatiran amaba sixitaan ayaad sameyn kartaa haddii aad aragtid qaladaad. Sida ugu dhaqsida badan ee ugu suurtagalsan waa inaad wax ka qabatid, bilmatal, waxaa kaa caawin kara dadka Infobuska.

ZABHta waxaa surtagal ah, in ay ku weydiso dokumenti iyo wax caddeynayo aqoonsigaaga. Haddii aadan soo qaadan waraaqo sidaasi oo kale ah, waa inaad isku daydo inaad heshid. Runtii waa inaad si aad ah ugu dadaashaa inaad heshid. Maamullada waxay kaa filayaan wadashaqeyn sannado kaddib xattaa, marka xaaladdaada sharciga wax laga qabanayo. Laguuma oggola inaad la xiriirtid safaaraddaada inta ka horeysa inta ay soo dhammaystirmayso marxaladdaada magangalyadoonka. Haddii aad sidaasi sameysid waxaa la joojin codsigaaga magangalyadoon, waayo waxaad uga raadsatay caawimaad dalkaaga hooyo si ikhtiyaar ah.

Markaad keentid wax caddeynaaya aqoonsigaaga (baasboor ama wax la mid ah) sax ahantooda ayaa la baarayaa (tani waxaa sameynayo boliska, markan waa xafiiska Dowladda ee Dambi Baarista). Mararka qaar barista aqbaartaada waxaa lala kaashanayaa Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Jarmalka amaba Xafiiska Arrimaha Dibedda wuxuu u xilsaarayaa in ay baarto safaaradda Jarmalka ee dalkaaga hooyo. BAMFta waxay go'aan ka gaaraysaa codsigaaga magangalyo, keliya marka ay hesho natiijada baarista.

Haddii ZABHta iyo BAMFta aanay qabin su'aalo kale oo deg deg ah oo ay ku weeydiiyaan, dukumentigaaga waxaa loo dirayaa ZRSta ee Dawladda Bavaria oo Sare. Maamulkan wuxuu ku dejin meel cusub. Haddii aad si aad ah u xanuunsan tahay aadna ku qaadanaysid daryeel caafimaad halka aad ku nooshahay, amaba aad ku leedahay qaraabo aadna wadashaqayn fiican sameysid, maamulka inti suurtagal ah ayeey tixgelinayaan codsiga halka aad jeceshahay inaad degganaatid. Waxaa laguu soo dirayaa wax lagu magacaabo "warqadda beddelka" ugu dambeyn maalinta ka horreysa marka aad guuraysid". Waxaad isku daydaa inaad heshid macluumaad/la xiriira goleyaal latalin oo deegaanka cusub.

Waxaadna ku wargelisaa BAMFta cinwaankaaga cusub sida ugu dhaqsida badan uguna surtagalsan (fiiri bogga 9). Qaybta Ajaanibta si caadi ah uma gudbiso maclumaadka.

Markaad guurtid kaddib, ZRSta oo Munich waxay kaa sii ahaan kartaa masuul. Waxase suurtagal ah, in qaybta Ajaanibta ay xilkaaga la wareegto.

Nolosha marxaladda magangalyo

MAXAAD KU NOOLAAN?

Waxaad ka helaysaa nacfi bulsho dowladda Jarmalka. Waa inaad ogaatid waxa soo socda:
Waxaad codsatay magangalyo arrintaada waa ay socotaa/ waa lagu guda jiraa. Marxaladdan waxaad helaysaa nacfi aan lacag ahayn (dhar, raashin) iyo lacag tiradeedu tahay 134 Yuro bishii (AsylbLG). Xaqiiqadii, waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad waxaad u tegi kartaa Takhtar Guud (GP) oo ku daaweeya.
Qofka magangalyo codsaday, sharciga wuxuu u oggol yahay daryeel caafimaad oo xaddidan: daweyn deg deg ah (aan ahayn cudur joogta ah) ee cudur iyo xanuun, iyo daryeel caafimaad oo uurka iyo dhalmada. Daryeel caafimaad oo dheeraad ah ama gargaar xanuunnada kale caadi ahaan waxaad heleysaa oo keliya warbixinta Qaybta Caafimaadka kaddib. Adeegayaasha bulshada oo ay wehliyaan "Sozialbürgerhaus" ayaa kaa caawin kara habeyntani.

LA QABSASHADA DEGAAN

Su'aalo bulsho iyo sharciyeed: waxaa jira dad iyo ururro badan oo kaa caawin kara sidi aad ula qabsan lahayd deegaanka Jarmalka kaalana qayb qaadanaya nolol malmeedkaaga halkan. Halkan u jeedi su'aalahaaga:
Adeegayaasha bulshada iyo golayaasha macluumaadka socdaalka (Caritas, AWO, Innere Mission, Laanqayrta Cas ee Bavaria BRK .)

- Kuwani waa baraha ugu horreyaa ee aad u jeedin kartid su'aalaha nacfiga bulsho iyo macluumaadka ugu horreeya ee socdaalka: haddii aad rabtid inaad baratid afka Jarmalka amaba horumarisid xirfadahaaga, haddii aad rabtid inaad ogaatid goorta iyo sida aad xaq ugu yeelan karaysid inaad shaqeysatid iwm.
- Haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxay dhexdhexaadin karaan adiga iyo maamullada (ABH, BAMF) wixi ku saabsan waxyaabaha kor lagu soo sheegay.

Sozialbuvgenhauska kuu dhow

- Wuxuu wax ka qabtaa nacfiga bulshada oo ku salaysan baahidaada iyo waxaad xaqqa u leedahay. Ururrada Dhaqan wadaagga ayagaba way kaa caawin karaan dhanka isdhexgalka/ sidi aad ula qabsan lahayd nolosha cusub. Waxaa ku cawin kara Golayaasha Ajaanibta ee magaalooyinka iyo gobollada sidoo kale ayeey kuu cawin kartaa One-World-Initiative (oo Munich, Schwanthalerstraße 80).

Nolosha go'aanka magangelyo kaddib

Su'aalada sharciga iyo degganaanshaha. Waxkasta ee la xiriira deegaankaaga go'aanka KADDIB waxa wax ka qabto:

ABHta, haddii aad joogtid Munich: "Poccistraße":

ⓘ Waa inaad aaddaa ABHta si aad dokumenti/warqad aqoonsi u heshid (sida dhaafiye/ bluug baas "blauer Pass", oggolasho/Duldung) mid cusub oo laguu jaro iyo cusboonaysiin. Halkani waxaad ka qaadan doontaa oo kale ruqsadda shaqo.

ⓘ ABHta waxay ku warsan kartaa inaad dalka ka tagtid haddii aay BAMFta si kama dambays ah u diiday codsigaaga. Waxaa kale oo la mid ah haddii rafcaanka Maamulka VG la diido rafcaan kalena aan la oggolayn.

ⓘ ABHta waxay weydiin kartaa boliska si gudaha laguu dhigo haddii la go'aansado in dib lagugu celsho dalkaaga hooyo (masaafursho) amaba dalkale oo saddexaad oo nabdoon. Tallaabadan waxaa kale oo qaadi kara ZRSta Munich.

XAGEED JOOGAYSAA? Hooy iyo Shaqo ee Qaxooti:

Xafiiska Hoyga iyo Socdaalka (ee Munich, Franziskanerstr. 6 – 8)

ⓘ Waxaa laguu aqoonsaday qaxooti. Haddii aad go'aansatid inaad Munich joogtid laakinse aad u baahan tahay inaad ka guurtid Xarunta Qaabilaadda EAE, xafiiska Hoyga iyo Socdaalka wuxuu kaa caawini inaad heshid guri marka lagu siiyo sharci qaxooti. Laakinse, waxaad dooran kartaa inaad degtid meel kasta oo Jarmalka ka mid ah ee aad jeceshahay. Kaddib waxaad ka dalbanaysaa "Dhafiye Bluug "blauer Pass" Qaybta Ajaanibta ee meesha cusub oo degaankaaga ah.

ⓘ Waxaa jira mashaariic tirabadan oo lagu horumariyo isdhexgalka/sidi aad nolosha cusub ula qabsan lahayd - wareyso arrimahan!

ARGE (ee Munich „Franziskanerstraße 6-8)

ⓘ ARGEda waxay qayb ka tahay Hayadda Shaqada Federaalka waana ku cawini, markaad haysatid sharci qaxooti, haddii aad rabtid inaad baratid afka Jarmalka, shaqo inaad raadsatid ama aad heshid shahaadoyin xirfadeed.

23

Amar inaad dalka ka dhooftid – asbaab cusub oo magangalyo?

Ma la dhaafay waqtigii kama dambaysta ahaa? Ma qaadan kartid rafcaan kale? **Kaddib waxaad baartaa su'aalaha soo socda:**
Wax isbeddel ah miyaa ku yimid sharciga oo isbeddel ku keeni kara qiimeynta kiiskaaga magangalyadoon?
Mase isbeddeshay xaaladda dalkaaga hooyo si ay saameyn ugu yeelato kiiskaaga/xaaladdada magangalyadoon?
Haddii aanay BAMFta marki hore rumaysan caddeymahaaga, ma soo saari kartaa dukumenti/warqado dheeraad ah oo caddeeynaya runta? Waxaa muhiim ah inaanay qaladkaaga ahayn inaadan keenin dukumentigan marki hore.

Haddii arrimaha kor ku qoran ay ku quseeyaan waxaad ku sameyn kartaa dabagal codsigaaga magangalyadoon ee BAMFta. Arrintan waa inaad sameysid 3 bilood gudahood marka lagugu wargeliyay isbeddelka saameynta ku leh, amase aad heshid dukumenti cusub.

Caadi ahaan, wax tallaabo ah ee safarkaaga lama qabanqaabinayo ilaa iyo inta BAMFta ay go'aan ka gaareyso. Waxaa fiican inaad adigaba aad ku wargelisid Qaybta Ajaanibta dabagalka codsigaaga.

Midkasta oo ka mid ah marxaladahan, waa inaad macluumaad ka raadsatid xarunta la talinta oo qaxootiga amaba aad heshid garyaqaan wakiil kaa ah.
(waxaad cinwaanno ka heli kartaa bogga 2.)

Masaafurin: Maxaa dhacaya hadda?

Haddii laguu soo qoro amar masaafuris sababta oo ah arrintaada qaxootinimo ma guulaysan, waxayna kula tahay inaanay sax ahayn isla markiiba waa inaad la xiriirtaa gole latalin amaba garyaqaan (fadlan fiiri/eeg cinwaanka bogga 2). Halkaasi waxaad uga doodi kartaa nidaamka sharciga kaddibna qaado tallaabo kasta oo muhiim ah.
Xattaa haddii aad xiran tahay oo aad sugaysid masafuris, waxaad la xiriiri kartaa golayaasha latalinta qaxootiga, bilmatal, waxaad sii marsiin kartaa adegeyaasha bulshada, eena codso booqasho.

Tallaabooyin dheeraad ah:
Waxaa suurtagal ah in Qaybta Ajaanibta ABH ay tahay xiriirkaaga ugu habboon/fiican (bilmatal safar suurtagal maaha, arrimo qoys ayaa jira).
Laakinse waxaa kale oo dhici kara inaad markale u baahan tahay inaad kala xiriirtid BAMFta waxyaabo door ka ciyaari kara marxaladdaada magangalyo (bilmatal, jirro muddo dheer ku haysay).

Haddii ay tahay inaad dalka ka dhooftid amaba aad rabtid inaad dhooftid, waxaad gargaar ka heli kartaa adeegayaasha bulsho, gole latalin iyo mid ka mid ah Golayaasha Latalinta dadka dib ugu noqonaya dalkooda hooyo
(bilmatal, Xafiiska Hoyga iyo Socdaalka ee Munich).
Waxay kaa saacidi karaan diyaargarowgaaga iyo noqoshadaada suurtagalka ah
iyo waxa kale aay kuu heli karaan gargaar lacageed.

Infobus für Flüchtlinge, c/o amnesty international
Volkratstr. 76, 80636 München
Tel: 089/16 54 12
Tel: c/o Münchner Flüchtlingsrat, 089/123 900 96, Fax: 089/123 921 88
Mobil: 0176 - 676 063 78
E-mail: infobus@amnesty-muenchen.de

Counselling in Bayernkaserne (Heidemannstr. 60)
Monaday 4.00-6.00 pm
Wednesdays, 6.00-8.00 pm

Counselling in Baierbrunnerstraße 14:
Saturdays, 3.00-5.00 pm

www.muenchner-fluechtlingsrat.de

Wenn Sie unsere Arbeit unterstützen möchten, freuen wir uns über eine Spende auf das Konto des Vereins zur Förderung der Flüchtlingsarbeit:
Kto. 314 344, BLZ: 701 500 00, Stadtsparkasse München, Stichwort „Infobus“.